

# TILMAAMAHA LA SIIYO BUKAANKA DAWEYNTA CUDURADA WADNAHA KLIINIKADA MANKATO

## Baarista Shiddada Wadnaha Lagu Sameeyo Dobutamine

Dobutamine Stress ECHO - Somali

**Taariikhda Ballanka:** \_\_\_\_\_ **Waqtiga:** \_\_\_\_\_

**Goobta:** Iska xaadiri Miiska Soo Dhaweynta Daweynta Cudurada Wadnaha (Cardiovascular Medicine Reception) ee ku yaal dabaqa kowaad waddada Main Street. Qiyaas ahaan, baarista waxay qaadataa 2 saac. Wac \_\_\_\_\_ haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan baarista.

### Maxay tahay sababta aan u qaadanaayo Baarista Shiddada Murqaha Wadnaha Lagu Sameeyo Dobutamine (Dobutamine Stress ECHO)?

Cabbiraha shiddada wadnaha dobutamine waa hab lagu baaro oo la isticmaali karo marka bixiyaha uu rabo in uu qiimeeyo muruqa wadnaha marka uu ku sugan yahay xaaladda shiddada. Haddii aan jimicsi lagu sameyn karin mashiinka socodka (treadmill), taasoo ugu wacan xaaladda caafimaadka qofka, waxaa dhiici karto in bixiyaha isticmaalo daawada laga qaato xiddidada ee lagu magacaabo dobutamine. Dobutamine waxay sababtaa in wadnaha aad u garaaco iyo waxay mattashaa saamaynta jimicsiga ku leeyahay wadnaha.

### Baarista Ka Hor:

- Ha cabbin sigaar muddo 24 saac ka hor inta aadan gelin baarista. Waxaa ka mid ah sharootada nikotiinka.
- Ha cunin ama ha cabbin waxyaabaha laga helo kafein muddo 24 saac ka hor inta aadan gelin baarista. Waxaa ka mid ah qaxwada laga saaray kafeiinka iyo dhamaan noocyada shaaha, cabbitaanka, waxyaabaha ka samaysan shukulaatada, Anacin® iyo Excedrin®
- Ha cunin ama ha cabbin waxba muddo 4 saac ka hor inta aan la gelin baarista.
- Ha qaadanin dawyooyinka cadaadiska dhiigga muddo 24 saac baarista ka hor, haddii bixiyahaada uusan ku siinin tilmaamo kale.
- Waxaad keentaa liis qoran oo ku saabsan dhamaan dawooyinka aad qaadatid. Hubso in aad ku dartid dawooyinka la qoro, dawooyinka laga iibsado miiska, maadooyinka dabiiciga iyo cagaarka.
- Waxaad soo qaadataa labbis holof ah oo korka u roon.
- Iska ilaali jimicsiga adag maalinta baarista.
- Ha marsanin saliid, waxyaabaha jilciya maqaarka, ama saliidda cunugga (baby oil).

### Inta ay Socoto Baarista:

- Waxaa lagu weydiin doonaa in aad iska dhigtid dharka laga bilaabo dhexdaa ilaa inta ka koreysa, dumarka waxaa laga rabaa in ay iska saaraan naas celinta, iyo waxaa la siin doonaa gorgoro ay qaataan.
- Waxaa la diyaarin doonaa maqaarka, ragga si wanaagsan ayaa loogu xiiri doonaa, kaddibna maqaarka waxaa lagu nadiifin doonaa alkolo. Waxaa xabadka lagu dhajin doonaa toban iyo shan qaadeyaasha korantada, kuwasoo lagu sii dhajin doono ECG.
- Waxaa la qaadaa cabbirada ECG iyo cadaadiska dhiigga.
- Bukaanka waxay u seexan doonaan dhinaca bidix iyaga oo kor u qaada gacanta bidix si loo qaado sawirada ECHO. Bukaanka waa in uu ahaado sidaas ilaa inta baarista ka socoto.
- Waxaa lagu bilaabi doonaa IV, waxaana lagu xeri doono bambka IV. Waxaa xididka lagaaga shubi doonaa daawada dobutamine. Daawada waxay sababi doontaa in wadnahaada uu kordhiyo garaaca una garaaco si adag, sida in aad jimicsaneysid. Marka lagu shubaayo daawada dobutamine iyo kaddib, waxaa la qaadi doonaa sawiro ECHO oo dheeraad ah.
- Waa caadi in aad dareentid garaaca wadnahaada muddo daqiiqado yar. Intaas waxaa dheer, waxaa dhici karto in lala kulmo waxyeelo sida xanuunka/cadaadiska xabadka, madax xanuun, wareer, labolabo, neef yari, gariir, kuleel iyo sida in wax kugu socdaan. Haddii aad isku aragtid calaamadahaan ama calaamado kale oo kugu dhaliya fakar, waa in aad isla markiiba ogeysiisid shaybaarka shiddada. Dobutamine waxay socotaa muddo gaaban, sidaas darteed dhakhso ayay u dhamadaan waxyeeladeeda marka la joojiyo ku shubidda Dobutamine.
- Waxaa la joojiyaa ku shubidda dobutamine ka hor inta aysan dhamaanin 12da daqiiqo haddii:
  - Aad ka badsatid "bar tilmaameedka" garaaca wadnaha taasoo ku saleysan da'da.
  - Takhtarka Wadnaha (Cardiologist) ama Farsame yaqaanka/Kalkaalayaha Wadnaha (Cardio Tech/Nurse) ay isbaddal aan caadi ahayn ku arkaan EKG.
  - Aad la kulantid calaamdo culus, sida neef yari, xabad xanuun, xabadka oo ku xerma, ama wareer.

### Baarista Kaddib:

- Baarista kaddib, waa lala socon doonaa bukaanka ilaa calaamadaha ka baxaan meesha iyo garaaca wadnaha, cadaadiska dhiigga, iyo ECG ku soo noqdaan caadi.
- Waa lagaa saari doonaa IV.
- Waa lagaa saari doonaa sharootada ECG kaddibna bukaanka waa labbis doonaa.
- Xafiiska bixiyaha soo dalbaday ayaa bukaanka kala soo xariiri doono natiijada.